

# Hagaha Sharaxaya Warbixinta Qoyska Fasalada 3-8 ee Imtixaanka Gobolka Ohio

## Fahmidda Natiijada Imtixaanada Ardaygaaga ee Gu'ga 2018 Ohio | Department of Education

Hagahan waxuu sharaxi doonaa micnaha qayb walba oo warbixinta natiijada ardaygaaga ah. Bogagga soo socda waxay muujinayaan warbixin tusaale ah ee arday lagu magacaabo Jane Smith Ardaygaaga natiijadiisa iyo horumarkiisu waa warbixin la mid ah midda Jane oo kale.


Hagahan waxuu khuseeyaa warbixinta natiijada maadooyinka fasalada 3-8:

- Fanka Luuqadda Ingiriiska: Fasalada 4-8
- Xisaab: Fasalada 3-8
- Saynis: Fasalka 5 iyo Fasalka 8

Warbixin nocee ah ayaa hagahan ku jirta?



1



Ardaygaaga **magaciisa, taariikhda dhalasho, iskuulka, iyo dagmadu** waxay ka muuqdaan dusha sare ee bogga hore, oo ay weheliso qoraal hordhac ah.


Waalidku waxay heli karaan **macluumaad iyo warbixin** marka ay booqdaan websaytyada ku yaal xaga hoose ee bogga.

*Afeef: xogta ku qoran Warbixinta qoysku waa tusaale oo kama turjumayso natiijooyin run ah. Magaca ardayga ee tusaalaha ku qoran waa mid la alifay, hadii uu la mid noqdo magac arday jira, waa nasiib ayay ku dhacday.*

FAMILY SCORE REPORT



Mathematics assessment



What are your child's strengths and weaknesses in Mathematics?

Subject	Strengths and Weaknesses
Ratios and Proportions	Students understand and use ratios to compare. <b>WHAT THESE RESULTS MEAN</b> Your child understands ratios and uses them to compare. <b>NEXT STEPS</b> Ask your child to use symbols to represent where time passes and space.
Expressions and Equations	Students understand and use ratios to compare. <b>WHAT THESE RESULTS MEAN</b> Your child understands ratios and uses them to compare. <b>NEXT STEPS</b> Ask your child to use symbols to represent where time passes and space.
Geometry and Statistics	Students understand and use ratios to compare. <b>WHAT THESE RESULTS MEAN</b> Your child understands ratios and uses them to compare. <b>NEXT STEPS</b> Ask your child to use symbols to represent where time passes and space.
The Number System	Students understand and use ratios to compare. <b>WHAT THESE RESULTS MEAN</b> Your child understands ratios and uses them to compare. <b>NEXT STEPS</b> Ask your child to use symbols to represent where time passes and space.
Modeling and Reasoning	Students understand and use ratios to compare. <b>WHAT THESE RESULTS MEAN</b> Your child understands ratios and uses them to compare. <b>NEXT STEPS</b> Ask your child to use symbols to represent where time passes and space.

Natiijada Imtixaanka Gobolka Ohio ee **ardaygaaga iyo heerka uu gaaray** waxaa lagu muujiyay sanduuc leh falaadh tilmaamaysa qaybta la midabeeyay. Waxaa isbarbardhig ahaan loo muujiyay natiijada ardayga isku heerka ah ee iskuulka ardaygaaga (Natiijada Celceliska ah ee Iskuulka) iyo tan ardayga isku heerka ah ee Iskuulada Bulshada ee Ohio (Natiijada Celceliska ee Gobolka).

**Natiijooyinka xariijinta madow ka koreeya** waxay gaareen heerka gobolka. **Natiijooyinka xariiqinta madow ka hooseeya** ma gaarin heerka gobolka.


**Sharaxaad faahfaahsan ee heerka uu ardaygaagu ka keenay** maaddo walba waxay ku taal warbixinta natiijada ardayga (score report), waxayna sharaxaysaa xirfadaha iyo awoodaha guud ee ardayga galaya imtixaannada Gobolka Ohio. Warbixin dheeri ah, faqlan warbixinta ee Shabakadda Imtixaanada Gobolka Ohio.

Subject	Jane Scored Below Proficient	Jane Scored Near Proficient
The Number System	<b>WHAT THESE RESULTS MEAN</b> Your child finds area, volume and surface area with whole number side lengths but may struggle with fractional lengths. She shows numerical data in different ways, and finds the average and middle value of a set of data. <b>NEXT STEPS</b> With your child, talk about different objects (walls, floors, boxes), and when to find area and volume. Discuss filling (volume) and covering (area) real-life situations. Measure some objects and compute the area or volume.	<b>WHAT THESE RESULTS MEAN</b> Your child uses models to divide fractions by fractions, uses number lines to compare negative numbers, finds common factors and multiples (for 8 and 12, 4 is a common factor, and 24 is a common multiple), and performs operations on multi-digit decimals. <b>NEXT STEPS</b> With your child, use visual models to help divide a fraction by a fraction. Pick a point at random on the coordinate plane, and have your child find it. Provide opportunities to add, subtract, multiply, and divide multi-digit decimals.
Modeling and Reasoning	<b>WHAT THESE RESULTS MEAN</b> Your child solves most routine real-world problems mathematically. Your child's thinking relates skills and concepts to mathematical principles. <b>NEXT STEPS</b> Your child needs to use more mathematical terms, symbols and models when solving and explaining real-world problems.	<b>WHAT THESE RESULTS MEAN</b> Your child solves most routine real-world problems mathematically. Your child's thinking relates skills and concepts to mathematical principles. <b>NEXT STEPS</b> Your child needs to use more mathematical terms, symbols and models when solving and explaining real-world problems.

FAMILY SCORE REPORT



Mathematics assessment




Jane's score is 706.

**Sharaxaadda qayb walba** waxa ka muuqanaysaa dhinaca bidix ugu xiga, waxayna ka hadlaysaa waxqabadyada ay ardayda aqoonta u leh qayb walba ay tahay inay sameeyaan.

Qaybta **Micnaha Natiijooyinkan** qaybtu waxay sharaxaysaa fahmidda guud ee uu ardaygaagu fahmayo waxa ku jira qaybtan, iyadoo lagu saleeyay heerkiisa/heerkeeda awoodeed.

Has Jane reached proficient in the areas of Mathematics?



Qaybta **Talaabooyinka ku xiga** talooyinku waxay ku salaysan yahiin heerka uu ardaygaagu ka keenay maadada. Qaybtan waxay bixinaysaa macluumaad ku saabsan waxqabadyo aad ardaygaaga la samayn karto, si kartidiisa/kartideeda loo dhiso, oo looga saaro ku liidashada maadada lagu imtixaanay.

What are your child's strengths and weaknesses in Mathematics?

<p><b>Ratios and Proportions</b></p> <p>Students understand and use ratios (comparing numbers by division), unit rates (like price per ounce), and percents to describe relationships between numbers and solve real-world problems. They use ratios and unit rates to create tables of equal ratios, graphs, and convert units of measurement.</p>	<p><b>Jane Scored Near Proficient</b></p> <p><b>WHAT THESE RESULTS MEAN</b> Your child uses the understanding of ratios, rates and percents to describe relationships between numbers, to create ratio tables and to solve problems. She uses ratio tables to convert units of measure.</p> <p><b>NEXT STEPS</b> Ask your child to represent a real-world context symbolically (50 miles per hour can be shown as 50t, where t is hours). Have your child create a driving-time plan to reach a destination, considering miles and speed limits.</p>
<p><b>Expressions and Equations</b></p> <p>Students write expressions for situations. They find values of expressions with exponents (like 4<sup>3</sup>) and letters that stand for numbers (when p=3, then 2p=6). They identify or create equivalent expressions (like x+3x=4x). They write and solve 1-step equations or inequalities like x+3=5 or 2x&gt;10.</p>	<p><b>Jane Scored Near Proficient</b></p> <p><b>WHAT THESE RESULTS MEAN</b> Your child writes and finds the value of expressions with exponents like 2<sup>3</sup> and variables like 2x+1 for situations; identifies equivalent expressions like 2x+5x+3x=10x; writes and solves one-step equations and writes inequalities like x+4=13 or 2x&lt;6.</p> <p><b>NEXT STEPS</b> With your child, model operations using expressions like 2(x+5). Use blue tiles as "x" and green tiles as "1." Show 2(x+5) as 2 groups of x+5 (1 blue and 5 green tiles). Regroup the tiles to see there are 2 blue tiles and 10 green tiles, so 2(x+5)=2x+10.</p>
<p><b>Geometry and Statistics</b></p> <p>Students solve problems by finding the area and volume of complex figures and surface areas of solids using different strategies, and drawing polygons in coordinate grids. They use graphs to show and interpret data based on how spread out the data are and their central values.</p>	<p><b>Jane Scored Below Proficient</b></p> <p><b>WHAT THESE RESULTS MEAN</b> Your child finds area, volume and surface area with whole number side lengths but may struggle with fractional lengths. She shows numerical data in different ways, and finds the average and middle value of a set of data.</p> <p><b>NEXT STEPS</b> With your child, talk about different objects (walls, floors, boxes), and when to find area and volume. Discuss filling (volume) and covering (area) real-life situations. Measure some objects and compute the area or volume.</p>
<p><b>The Number System</b></p> <p>Students add, subtract, multiply, and divide multi-digit whole numbers and decimals to the hundredths to solve real-world problems. They divide fractions by fractions and apply to familiar situations. They understand positive and negative numbers and plot points on a four quadrant grid.</p>	<p><b>Jane Scored Near Proficient</b></p> <p><b>WHAT THESE RESULTS MEAN</b> Your child uses models to divide fractions by fractions, uses number lines to compare negative numbers, finds common factors and multiples (for 8 and 12, 4 is a common factor, and 24 is a common multiple), and performs operations on multi-digit decimals.</p> <p><b>NEXT STEPS</b> With your child, use visual models to help divide a fraction by a fraction. Pick a point at random on the coordinate plane, and have your child find it. Provide opportunities to add, subtract, multiply, and divide multi-digit decimals.</p>
<p><b>Modeling and Reasoning</b></p> <p>Students analyze, make sense of, and apply mathematics to solve real-world problems. They draw, justify, and communicate conclusions or inferences supported by logical and mathematical thinking.</p>	<p><b>Jane Scored Near Proficient</b></p> <p><b>WHAT THESE RESULTS MEAN</b> Your child solves most routine real-world problems mathematically. Your child's thinking relates skills and concepts to mathematical principles.</p> <p><b>NEXT STEPS</b> Your child needs to use more mathematical terms, symbols and models when solving and explaining real-world problems.</p>

## Su'aalaha Badanaa La Iswaydiiyo

### Waa maxay ujeedada Imtixaanada Gobolka Ohio?

Natijoyinka imtixaanada gobolku waxay inoo sheegaan sida ay ardaydu ku tahay aqoonta iyo xirfadaha lagu qeexay Heerarka Waxbarasho ee Ohio. Imtixaanadan waxay naga caawiyaan inay hagaan oo xoojiyaan waxbaridda mustaqbalka si aan u hubino inaan ardaydeena u diyaarino guul waqti-fog ee iskuulka, kuleejada, xirfadaha iyo noloshaba Natijoyinka imtixaanku waxay bulshada u ogolaanaysaa inay ogaadaan heerka iskuulka deegaankooda marka la barbardhigo iskuulada kale ee gobolka.

### Sidee iyo halkee imtixaanada lagu diyaariyay?

Samaynta imtixaan waa hab qoto-dheer oo marwalba socda, si loo xaqiyo in imtixaanada gobolku ay yahiin kuwo sax ah oo ku haboon cabiridda aqoonta iyo xirfadda ardayga.

El Waaxda Waxbarashada ee Ohio waxay la shaqaysay barayaasha Ohio iyo Machadka Cilmibaaridda ee Maraykanka, si loo horumariyo imtixaanada gobolka. Guddiga Kala-tallinta Macluumaadka, iyo guddiga daacadnimada iyo

udabacsanaanta ayaa ka wadhadlay in waxa ku jira imtixaanka ay sax oo ay ardaydu u siman tahay, inay ku haboon yahiin koorsada iyo in lagu cabiray Heerarka Waxbarasho ee Ohio.

Marka imtixaanada la sameeyo, koox kale oo bareyaal ah oo ka shaqaynaya gudigga dajinta-heerka ayaa u kala qaybiya shan heer. Golaha Waxbarashada ee Gobolku ayaa ogolaaday soo jeedintan. Warbixinta iyo macluumaadka dhamaan heerarka iyo sharaxaadda heerarka-[natijoyinkaka hel bogga shabakadda](#) Imtixaanada ee Gobolka Ohio.

### Ka waran haddii ay warbixinta ku jiraan meelo maran ama aysan natijoo ku qornayn?

Haddii natijada ardaygaaga la diiday, wax natijoo (buundo) ah kama muuqanayso warbixinta. Waxaa intaas dheer, qaybta awoodda iyo liidashada ardayga ee lagu faahfaahiyay bogga 3 waxay sheegi doontaa “Xog lama hayo (No data available). Macalinka ardaygaaga la hadal haddii aad su'aal qabto.” Fadlan la xariir iskuulka ardaygaaga haddii aad qabto su'aal la xariirta weedhan.

## Diiwaanka Eraybixinta/Qeexitaanka

**Qaybaha ku Jira (Maadooyinka)**— Qaybaha oo sidoo kale loo yaqaan Maadooyin, (tusaale fanka luuqadda Ingiriiska, xisaab, saynis, iyo culuunta bulshada).

**Waaxda Heerarka Waxbarashada ee Ohio**— Waaxda Heerarka Waxbarasho ee Ohio waxay qeexdaa waxa laga rabo inay ardaydu yaqaanaan ama ay awoodaan inay sameeyaan. Warbixin ku saabsan Heerarka Waxbarasho ee Ohio ka hel websaytka Waaxda Waxbarashada ee Ohio [education.ohio.gov](#).

**Heerarka Natijada (Performance Levels)**— Maado walba waxay leedahay 5 heer oo natijoo waxqabad. Saddex heerarka natijada ka mid ah (Aad u sareeya, La dadajiyay, iyo Aqoon sare, (Advance, Accelerated, proficient)) waxay ka koreeyaan natijada aqoonta sare ee 700. Laba heerarka natijada ka mid ah (Bilow iyo Xaddidan (Basic and Limited)) waxay ka hooseeyaan natijada aqoonta sare. Heerka aqoonta la dadajiyay waxay sheegaysaa in ardaygu uu u socdo kuleejo ama diyaarsanaanta shaqo. Maado walba waxay leedahay qeexid khaas ah ee heerarkan natijoyinka, oo lagu magacaabo Qeexidda Heerka Natijada (Performance Level Descriptors). Qeexidda Heerka Natijada ee maadooyinka oo dhan waxaa laga heli karaabogga macluumaadka warbixinta ee [shabakadda Imtixaanada ee Gobolka Ohio](#).

**Qaybaha Warbixinta**— Imtixaan walba waxuu leeyahay saddex ilaa iyo 5 qaybood oo warbixin ah. Qaybaha warbixintu waa qaybo muhiim ah oo maado walba ku jira. Tusaale ahaan, qaybo xisaabta fasalka 3 waa Isku-dhufasho iyo Qaybin, Lambaro iyo Kashaqayn, jajab, joomitiri, qaabaynta iyo sababayn.

**Tilmaamayaasha Qaybaha Warbixinta**— Natijoyinku imtixaanku waxay keenaan qaybo xirfado isku mid ah ama heerar waxbarasho lagu cabiray qaybaha warbixinta imtixaanka. Tusaale ahaan, qayb warbixin ee xisaabta fasalka 3 waxay noqonaysaa Isku-dhufasho iyo Qaybin. Natijoyinka imtixaanku waxay ka warbixiyaan waxqabadka ardayga ee isku-dhufashada iyo qaybinta (ama qaybo kale oo ku jira qaybta warbixinta. Tilmaamayaashani waa *ka hooseeya aqoon sare, u dhow aqoon sare iyo ka sareeya aqoon sare*.

**Natijoyinka (buundada)**— natijoyinka hore (natijada la helay) la isuma barbardhigi karo imtixano noocyo kala duwan, sidaas darteed waxaa loo badalaa natijoo shax ah si warbixin ahaan loogu soo gudbiyo. Natijoyinka shaxda ah ee imtixaan isku mid ah waa la isu babardhigi karaa maamulo kala duwan. Tusaale ahaan, shaxda natijoyinka ee ardayda gashay imtixaanka gobolka ee fanka luuqadda Ingiriiska fasalka 3-aad ee gashay sanadkan waxaa loo barbardhigi karaa sanadkii hore. Shaxda natijoyinka ee maadooyin kala duwan la isuma barbardhigi karo.